

Waa Maxay Raad-raacida Dadka?

Raad-raacida dadku micnaheedu waa wacida dadka laga yaabo inuu soo gaaray COVID-19. Caafimaadka Dadweynaha ayaa isticmaala raad-raacida dadku si looga hortago faafida cudurada, sida Jadeecada iyo COVID-19. Ka jawaab wicitaanka si aad gacan uga geysato in adiga iyo bulshadaada aad baadqab ahaataan una joojiso faafida COVID-19.

Waa tanaa sida ay u shaqeeyso

Daryeel caafimaad bixiye ayaa sheegayo in baaritaankaaga COVID-19 uu muujinayo inaad qabtid COVID-19.



Marka xigta, maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama bulshadaada ayaa ku soo wici doona kaana caawin doona:



- Inaad barato sida si baadqab ah la iskugu takooro:
 - » **Is-takoorida** micnaheedu waa inaad ka fogaato qof kasta, oo ay ku jiraan dadka aad la nooshahay.
- Xusuuso meelaha aad tagtay iyo cidda aad aragtay intii aad cudurka faafin kartay. Dadkani waxaa loogu yeeraa **xiriiradaada**.

Inta aad istakooraysid, raad-raacayaasha dadka ee ka socda maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama bulshadaada ayaa wici doona dadka aad u dhawaatay. Si loo ilaaliyo asturnaantaada, raad-raacayaasha dadka ma sheegi doonaan magacaaga.

Raad-raacayaasha dadka waxay:

- Ku xiri doonaan dadka aad u dhawaatay khayraadyo waxayna
- Kula talin doonaan inay **is-karantiilaan**.
 - » Karantiilka micnaheedu waa inaad guriga joogta aadna ka fogaato lix fuud qof kasta.



Raad-raacayaasha dadka ayaa wici doona ama qoraal u diri doona dadka aad u dhawaatay maalin kasta si ay u ogaadaan sida ay dareemayaan.

Haddii, inta uu karantiilka socda, uu qofsoo bixiyo astaamo:



- Raad-raacayaasha dadka ayaa ku dhiirigelin doona in laga baaro COVID-19 waxayna weydiin doonaan cidda ay la kulmeen kahor inta aysan bilaabin karantiilka.
- Raad-raacayaasha dadka ayaa dabagal ku sameyn doona dadka ay la kulmeen.

Dhamaadka karantiilka, dadka aan soo bixinin astaamaha cudurka ayaa joojin kara karantiilkooda.



Dadka reer Oregon-oow, aan ka jawaabno wicitaanka.

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintiyo qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.